

Machadka Qaram ee
Caafimaadka Dadwaynaha iyo
Bii'ada wASaarada Caafimaadka,
Faya dhawrka iyo Ciyaaraha

Ciwaanka Foomka Lagu celinaayo: RIVM-DVP South, PO BOX 4151, 5604 ED EINDHOVEN

Ku socota waalidka/daryeelaha

Lambarka adeegga
muwaadinta:

Taariikhda: XXX 2023
Mawduuca: Talaalka cunugaaga

Lifaaqa waxaa ku jira:
- Kaarka talaalka
- Waraaqda xogta oo ku saabsan talaallada carruurta jira afar sano

Waalidka/daryeelaha qaaliga ahoow,

Marka la gaaro ama ay u dhowdahay dhalashadeeda afraad, gabadhaada waxaa la siin doonaa talaalka DTaP-IPV. Talaalku wuxuu ilmahaaga ka difaacayaa gawracatada, jixdheerta (xiiqda), teetanada iyo booliyada. Waxaad xog dheeraad ah oo arintaan la xariira ka haysaa waraaqda xogta ee la socota waraaqdaan.

Xagee iyo goorma?

Cunugaaga ayaa heli doona talaalka marka aad timaado rugta caafimaadka ilmaha. Adeegyada caafimaadka dhalinyarada ayaa balan kuu qaban doona. La imoow kaarka talaalka xiliga balanta. Waxaad xogtaan ka haysaa boqshada. Sidoo kale la imoow shahaadada talaalka ilmaha. Haddii aan cunugaagu wali qaadan dhammaan talaalka, waxaad kaararka talaalka oo dheeri ah ka haysaa boqshada.

Maxaa loogu baahan yahay talaalka?

Barnaamijka Qaran ee Talaalka ayaa ka difaacayaa ilmaha 12 cudurada caabuqyada xunxun ah. Waxaa samaynaynay shaqadaan muddo 65 sano ah, marka cuduradaan ayaa intooda badan baaba'ay. Waxaad xog dheeri ah oo ku saabsan cuduradaan ka haysaa waraaqda tilmaamaha.


Waraaqda xogta bukaanka

Talaalka ayaa si adag loo tijaabiyay. Waa mid badqab leh. Cunugaaga ayaa wali cilado ka qaadi kara, sida qandho fudud. Ma doonaysaa inaad ogaato waxa ku jira talaalka DTaP-IPV? Akhri waraaqda xogta bukaanka. Waxaad xogtaan ka haysaa rijksvaccinatieprogramma.nl/bijsluiters.

Wax su'aalo ah ma qabtaa?

Booqo rijksvaccinatieprogramma.nl,
[booqo thuisarts.nl](https://booqo.thuisarts.nl)
ama waydii dhakhtar ama kalkaaliso joogta xarunta caafimaadka ilmaha.

Kheyr ayaan kuu rajaynayaa,



Jeanne-Marie Hament, dhakhtar

000000007038664